



# **MARKA ILMAHAAGA LAGU MEELEEYO MEEL KA BAXSAN GURIGA**

**Waalid kastaa isaga ayaa  
mas'uul ka ah kharashka  
ilmahiisa**

# **Adigu waxaad mas'uul ka tahay kharashka ilmahaaga**

Dhammaan waalidiintu waxay mas'uul ka yihiin kharashka ilmahooda, iyadoo aan loo eegin haddii lala nool yahay ilmaha ama la leeyahay/haysto masuuliyadooda.

Marka ilmaha ay adeega bulshadu ku meeleyaan guriga xannaanada carruurta (familjehem), ee lagu daryeelaayo ama hoyga (HVB) ama degaanka la taageero (stödboende), ayaad adigu waalid ahaan ay kugu waajib tahay inaad kamuunka siiso lacag khidmad ah. Sharcigu wuxuu shaqeynayaa/khuseeyaa iyadoo aan loo eegin sababta ilmaha loogu meeleyay meel guriga ka baxsan iyo ilaa iyo inta ilmuu uu 18 sano jirsanaayo.

## **Imisa ayaad bixinaysaa?**

Xaddiga lacagta khidmaddu waxa uu ku saleysan yahay dakhligaaga canshuurta laga bixiyey ee ugu dambeeyay iyo inta caruur aan qaangaarin ee aad leedahay. Heerka ugu sarreeya ee lacagta khidmadda waxay la mid tahay ta taageerada dhaqaalahaa la siiyo carruurta la nool mid ka mid ah labadiisa waalid. Haddii aanad dhakhli haysan, ama aad leedahay dakhli aad u hooseeya, ayay lacagta khidmaddu noqon kartaa inaan waxba lagaa qaadin/eber karoon.

Si adeega bulshadu ay ugu xisaabiyaan khidmadda, ayaad u baahan tahay inaad soo gudbiso macluumaadka dakhligaaga.



## **Haddii aad rabto inaad wax dheeraad ah ogaato**

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan lacagta oo aad rabto inaad wax dheeraad ah ogaatid waxyaabaha ku saabsan sida maareynta loogu sameeyo ayaad la xiriiri kartaa kaaliyaha daryeelka bulshada ee ilmahaaga qaabilsan.

Macluumaaad ku saabsan luqado kale, ka eeg bogga internedka.

### **Muxuu sharcigu odhanayaa?**

Haddii aad taas bedelkeeda rabto inaad akhrido waxa sharciga ku yaala ee ku saabsan lacagta khidmadda, ayaad taas ka heli kartaa shuruucdan soo socota:

- Xeerka waalidnimada cutubka 7aad, qaybta 1 §
- Xeerka adeega bulshada cutubka 8aad, qaybta 1 §
- Xeerka amarka adeega bulshada cutubka 6aad.
- Xeerka caymiska bulshada, cutubka 18aad. iyo cutubka 19aad.



JÄRFÄLLA

**Maamulka bulshada**  
177 80 Järfälla  
08-580 285 00  
[jarfalla.se](http://jarfalla.se)